

# Isqoridda Muddada Isqoritaanka Gaarka ah

CAYNSNAAN MARKA AAD U BAAHAN TAHAY



## Waa maxay Muddada Isqoritaanka Gaarka ah?

Xaaladaha qaarkood iyo dhacdooyinka nolosha ayaa kugu dhiirrigelinaya in aad isku qorto caymiska caafimaadka iyo ilkaha xilli ka baxsan muddada isqoritaanka furan ee sannadlaha ah. Tani waxaa loo yaqaanaa muddada isqoritaanka gaarka ah.

## Sideen isugu-qoraa?

Waxaad codsan kartaa inta badan muddooyinka isqoritaanka gaarka ah adiga oo adeegsanaya *Washington Healthplanfinder* ama app-ka *WAPlanfinder*. Waa in aad codsataa 60 maalmood gudahooda ka-dib marka ay xaaladdu isbeddesho. Xaaladaha qaarkood, waxaad codsan kartaa 60 maalmood ka hor.

## Dhacdooyinka Nolosha ee U-qalma

Dhacdooyinkan nololeed ee soo socda waxay xaq ku siin karaan muddada isqoritaanka gaarka ah. Liiskan kuma jiraan dhammaan dhacdooyinka suuragalka ah ee u-qalma, nagala soo xiriir 1-855-923-4633 su'aalo kasta ee aad qabto.

Dhacdooyinka Nolosha ee U-qalma	Barta internet-ka	Nala soo xiriir
Luminta caymiska caafimaad ee kale [shaqo beel, furiin, luminta Washington Apple Health (Medicaid) ama WSHIP]	✓	
Guur, ama gelidda iskaashi guri	✓	
Dhalasho, korsasho, ama geynta daryeel korsasho	✓	
Cascade Care Savings (Dakhliga qoyska ee ah ama ka hooseeya 250% FPL)	✓	
U-guurista Washington ama dal cusub oo ku yaalla Washington	✓	
Isbeddel ku yimaada dakhliga	✓	
Xubinnimada qabiil	✓	
Beddelka dhalashada ama xaaladda joogitaanka sharciga ah	✓	
Ka soo bixidda jeel ama xabsi	✓	
Dhibbanaha tacaddiga/xadgudubka reerka iyo qoyska ka dhex dhaca ama xaaska oo laga tago	✓	
Beddelka caymiska COBRA	✓	
Helidda amar maxkamadeed (oo uu ku jiro taakuleynta carruurta)	✓	
Noqoshada 26 iyo ka weynaanshaha qorshaha caymiska waalidka	✓	
Codsiyada xaqiijinta dokumentiga ayaa la xaliyay ka-dib markii horey loo diiday		✓
<i>Washington Healthplanfinder</i> khalad		✓

Dhacdooyinka Nolasha ee U-qalma	Barta internet-ka	Nala soo xiriir
Helitaanka Qabanqaabada Individual Coverage Health Reimbursement Arrangement (ICHRA) ama Qualified Small Employer Health Reimbursement Arrangement (QSEHRA) oo dhowaan la bixiyay iyada oo loo marayo loo-shaqeeyahaaga		✓
Dhowaan xaq-u-yeeshay amaahda canshuurta ama kaalmooyinka kharash-wadaagista ee is-qoritaanka: <ul style="list-style-type: none"> <li>• Hoos-u-dhaca dakhliga</li> <li>• Caymiska caafimaadka ee uu taabogaliyay loo-shaqeeyaha in aanan la awoodi karin</li> <li>• Lacagahii uu loo-shaqeeyaha horey ugu biirrin jiray lacagaha caymiska joogtada ah ee COBRA ayaa dhammaaday</li> </ul> Caymiska caafimaadka shakhsi ahaanta loo iibsaday ee laga soo gatey meel ka baxsan <i>Washington Healthplanfinder</i> ayaan la awoodi karin		✓
Bixiyaha qorshaha caafimaadka ayaa wuxuu jabiyay qandaraaska		✓
Xaalado gaar ah		✓

### Cascade Care Savings Muddada Isqoritaanka Gaarka ah

Qoysaska qaarkood waxay isqoritaanka gaarka ah codsan karaan waqti walba. Uma baahnid dhacdo nololeed u-qalanto in ay dhacdo. Dakhliga qoyskaaga waa in uu noqdaa ama ka hooseeya 250% FPL.

Tusaale ahaan, qoysaskan waxay u qalmi doonaa:

- ▶ Qoyska halka qof ka kooban ee uu dakhligiisu yahay ilaa \$33,975 sannadkii
- ▶ Qoyska saddexda qof ka kooban ee uu dakhligiisu yahay ilaa \$57,575 sannadkii

Nala soo xiriir haddii aadan ogeyn in aad u qalanto.

### Shakhsiyaadka Hinddida Mareykanka ama Alaskaanka Dhallad ah

Shakhsiyaadka Hinddida Mareykanka ama Alaskaanka Dhallad ah waxay isku qori karaan qorshe caafimaad waqti kasta oo sannadka ah. Waxaad kaloo beddeli kartaa qorshahaaga hal jeer bishiiba. Waa in aad ahaataa xubin qabiilka ka tirsan oo ku qoran ama saamiilaha Shirkad Alaskaan Asal ah si aad dheefahan u hesho.

### Taariikhda uu Caymisku Bilaabanayo

Caymiskaagu wuxuu caadi ahaan bilowdaa kowda bisha ka-dib marka aad codsato. Caymiska ayaa goor dambe bilaaban kara haddii aad soo sheegto caymis dhammaanaya taariikh mustaqbalka ah. Dhacdooyinka qaarkood, sida dhalashada, waxay si otomaatik ah u bixinayaan caymis taariikh hore dhaqangalaya. Ka-dib dhacdada u-qalanta, waxaad haysataa 60 maalmood oo aad qorshe ku dooraneyso.

### Dokumentiyada Loo Baahan Yahay

Shirkadaada caymiska waxay codsan kartaa dokumentiyo lagu xaqiijinayo isbeddelka aad soo sheegtay.



#### Telefoon Ahaan

Naga soo wac 1-855-923-4633  
TTY/TDD: 1-855-627-9604



#### Barta internet-ka

Booqo [wahealthplanfinder.org](http://wahealthplanfinder.org)  
ama soo degso app-ka  
WAPlanfinder.



#### Taageerada Degaanka

Waxaan la hawlgalkaa caawiyeyaasha gobolka oo dhan. Booqo [wahealthplanfinder.org](http://wahealthplanfinder.org) si aad mid uga raadiso degaankaaga.